

## Ka cabashada dugsiyadeena

Waa naga go'an tahay u xalinta cabashooyinka si dhakhso ah, saa daraadeed waxaa wanaagsan haddii aad na soo ogeysiisid wax ku saabsan waxaad ka welwelsan tahay sida ugu dhakhsaha badan.

Arimaha qaarkood waxaa laga yaabaa inay haboon tahay inaad la hadashid maamulaha dugsiya. Haddii aadan hubin ciddii aad u caban lahayd, ilmahaaga macalinkiisa ama shaqaalaha xafiiska dugsiya ayaa ku siin kara faahfaahinta xiriirka saxda ah.



### Ka hadlida dhibaatooyinku waxay noqon karaan siyaalaha ugu wanaagsan ee loo bilaabo xalintooda.

Ku bilow inaad la xiriirtid macalinka ilmahaaga, adoo la hadlaya shaqaalaha xafiiska dugsiya, ama dugsiya sare isku day la taliyaha fasalka. Cabashadaada adigaa qof ahaan soo jeedin kara, iimeyl, taleefan ama warqad haddii aad doorbideysid. Samee wakhti aad la kulantid macalinka ama dugsiya taleefan u soo dir oo weydiiso ballan.



### Marmarka qaarkood waxaa laga yaabaa in aan ku weydiino inaad cabashada qoraal ka soo dhigtid. Ku soo dar faahfaahin oo noo sheeg wixii aad jeclaan lahayd inay dhacaan dacwada darta.

Waan kaa caawin karnaa in cabashadaada qoraal laga dhigo. Waxaad isticmaali kartaa foomka cabashada ama Feedback Assist widget – labaduba waxay ku jiraan website ka Wasaaradda Waxbarashada. Wakhti u samee aad kula kulantid macalinka ama taleefan u soo dir dugsiya oo weydiiso ballan.



Xaalado badan, shaqaaluhu waxay maareyn karaan cabashada sida tooska loogu keenay. Cabashooyinka qaarkood waxay u baahan doonaan ku lug yeelashada maamulaha ama maareeyaha goobta shaqada.

Qofka maareynaya cabashada wuxuu soo ururinayaa macluumaadka ay baahan yihiin inay si hagaagsan ugu qiimeeyaan wixii walaac ah oo ay go'aan ka gaaraan kaas oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee hore loogu soconayo. Maareeyaha cabashada waxaa laga yaabaa inuu sameeyo weydiimo ka hor intuuusan kula soo xiriirin.

Markaad ka jawaabasiid cabasho, waxaa laga yaabaa inaad sameysid hal ama wax ka badan oo ah kuwaan soo socda:

- Qaad tallaabo si aad u saxdo arrinta ama u hagaajiso xaalada
- Cudurdaar ka bixi
- Sharaxaad bixi
- Garowso xaalada in si ka wanaagsan loo maareyn karay ama ka duwan
- Fulinta qorshayaasha dib u eegista.

Marmarka qaarkood, waxaa laga yaabaa in aanan awoodin bedelaada wixii dhacay ama maareeyaha cabashadu wuxuu go'aanmin doonaa in go'aankii hore uu ku haboonaa xaaladahaan. Wax kasta oo ay tahay natiijadu, maaraayaha cabashada ayaa kaa siin doona sababo cad go'aankooda. Tan waxaa laga yaabaa inay noqoto kulan ama taleefan ama iimeyl.

Haddii aadan ku qancin natiijada, waxaad weydiisan kartaa inaad la hadashid maareeyaha cabashada si aad ugala hadashid wax ku saabsan arimaha oo aad la soo qaadid waxaad ka walaacsan tahay.

Haddii aadan weli ku qancin ama aad rumeysan tahay in natiijada cabashadu aysan sax ahayn iyo/ ama in nidaamka maareynta cabashadu uu ahaa mid aan cadaalad ahayn, waxaad codsan kartaa dib u eegis. Codsiga waa in lagu soo hagaajiyaa maareeyihii ugu horeeyey ee cabashada ama kormeerahooda.

Dib u eegista waa inuu dhameystiraa qof aan sina shaqo ugu lahayn cabashada oo aan lug ku lahayn maareynta cabashada.

Dib u eegista cabashada ee bannaanka waxaa laga yaabaa inay sameeyaan ururada sida NSW Ombudsman.

### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka badan fadlan wac maamulaha dugsiyaaga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo weydiiso turjumaan luuqadaada ah. U sheeg xiriiriyaha taleefan lambarka aad dooneysid inaad wacdid xiriiriyuhu wuxuu khadka soo gelin doonaa turjumaan kaa caawiya wadhadalka. Adeega lacag lagaama qaadi doono adeega.